



## Amarka caafimaadka fayo-dhawrka oo burinaya shuruudaha maaskaraha guud ee gudaha guryaha

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxa ay aqbashay xeerka maaskaraha gudaha guryaha ee joogtada ah Febraayo 7, 2022. OAR 333-019-1025. Sida ku cad sharciga in Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka ama Sarkaalka Caafimaadka Fayo-Dhawrka ee Gobolku uu soo saari karo amar burinaya shuruudaha guud ee maaskaraha gudaha guryaha haddii shuruudahaas aanay daruuri u ahayn in la xakameeyo COVID-19.

Laga bilaabo Maarso 11, 2022 kadib 11:59 PM, shuruudaha guud ee maaskaraha gudaha guryaha ee OAR 333-019-1025 hadda ma shaqaynayaan. Shuruudaha maaskaraha gudaha gurayaha lagama maarmaan ma aha sababtoo ah saamaynta COVID-19 ayaa hoos ugu dhacday Oregon siyaabo dhowr ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn:

- Cisbitaal digidda COVID-19 keenay ayaa hoos uga dhacay 300.
- Laga bilaabo Maarso 8, 2022, celceliska 7-maalmood ee 520 xaaladood/maalintii ayaa 94% ka hooseeyay kii ugu badnaa ee 8,209 xaaladood/maalintii Janaayo 20; sidoo kale waa tirada ugu yar ee celceliska 7-maalmood tan iyo Luulyo 2021.
- Laga bilaabo Maarso 9, 2022, 75.5% dadka da'doodu tahay 18 iyo wixii ka weyn ee ku nool Oregon waxay dhammeeyeen taxanaha tallaalka COVID-19 ee aasaasiga ah marka lagu daro difaacyada kuwa dhowaan ka soo kabsaday COVID-19 intii lagu jiray kororki dhawaa ee ay sababeen noocyada Delta iyo Omicron.

OHA waxay ku talinaysaa dadka khatarta sare ugu jira cuduro daran iyo cusbitaal dhigidda, gaar ahaan bulshooyinka leh heerar dhexdhexaad ah ama heer sare ah oo gudbin ah sida uu qabo [Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada \(CDC\) Heerarka Bulshada ee COVID-19](#), inay sii wadaan xidhashada maaskaro gudaha goobaha gudaha guryaha, oo ay ku jiraan:


- Dadka aan tallaalinayn,
- Dadka uu difaaca jirkoodu hooseeyo,
- Dadka leh xaalado caafimaad,
- Dadka jira 65 ama ka weyn, ama
- La nool kuwa kale oo halis sare ugu jira cudur daran.

OHA waxa ay sii wadi doontaa in ay ka shaqeyso sidii ay u kordhin lahayd helida tallaalada, maaskaraha tayada leh, baadhista iyo daawaynta ee bulshooyinka sida gaarka u saameeyay COVID-19.

Ma jiro wax amarkan ka mid ah oo ka mamnuucaya hay'ad dawladeed, ganacsi, ama goob shaqo inay uga baahdaan in shakhsiyaadku xidhaan maaskaro. Shakhsiyaadka raba inay sii wataan xirashada maaskaro si ay uga hortagaan COVID-19 waa u xor inay sidaas sameeyaan.


Shuruudaha maaskaraha ee goobaha daryeelka caafimaadka ee hoos yimaada OAR 333-019-1011 ayaa weli dhaqan gal ah.

Taariikhdu markay ahayd 11-ka Maarso 2022.



---

Rachael Banks  
Agaasimaha Caafimaadka Fayo-Dhawrka  
Maamulka Caafimaadka Oregon  
Qaybta Caafimaadka Fayo-Dhawrka



---

Dean Sidelinger  
Sargaalka Caafimaad iyo Dhakhtarka Cudurada Faafa  
Maamulka Caafimaadka Oregon  
Qaybta Caafimaadka Fayo-Dhawrka

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa xogta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us)